

## Wada-shaqaynta waalidka iyo mihnadlayaasha

Wada-shaqaynta ka dhexaysa waalidka iyo mihnadlayaasha waxay xaqiijisaa in qof walbaa ku guulaysto wuxuu rabo.

Si kasta ha ahaatee, had iyo jeer wax sahlan maaha in wada-shaqayntu hirgasho.

### Maxay wada-shaqayntu u adag tahay?

Adeegyada badankood waxay leeyihiin nadaam la xiriira waalidka, wax ka qabashada nadaamkaasina badanaa waa adag tahay. Mihnadlayaasha qaarkood waxay aaminsan yihiin inay waalidka ka furteen hawl maadaama ay la wareegeen masuuliyadii ilmaha. Marmarka qaarkood daryeellayaasha carruurto waxay ku andacoodaan kuna sharxaan shaqadood inay la wareegaan dad carruurtiis kana dhigaan kuwoodii una xanaaneeyaan sidii kuwa ay dhalleen. Dad badan oo ka shaqeeya adeega daryeelka ilmaha ayaa aaminsan inay carruurta ay saamayn badan ku sameeyaan marka loo fiiriyo waalidka dhallay. Maaha in arrintaani qalad tahay keliya, laakiin waxay dhibaato u tahay carruurta sama-qabkooda. Khibrada daryeelka ilmuhu ma bedelayo ku barbaarinta qoyska, mihnadlayaasha adeegyada carruurtuna ma qaadanayaan booska waalidka saamayn badana kuma laha ilmaha marka loo fiiriyo tan waalidka. Ka wada shaqaynta adeegyada carruurta ayaa la mid ah wada-shaqaynta kasta sida midda ganacsiga ama wada-shaqaynta shakhsiyaadka. Kuwaan waxaa ku jira is-ixtiraamida, is-aaminka, dareemida mawqifka qofka kale, ama caadifad u haynta; wada-xiriir labada dhinac ah; hadafyo guud yahay kuwaas oo waadax ah la iskuna raacsan yahay; wada-shaqaynta kooxeed; is-qabsi iyo tartan la'aan; aqoonsi iyo qadarin doorka gaarka ah ee qofka kula shaqaynaya; iyo wada-samaynta go'aan loo dhan yahay.

Mararka qaarkood wada-shaqaynta waxaa lagu qaldaq doorka waalidka, taas oo waalidku kaga qaybgalo inuu caawimo ka geysto waxyaallaha ay ka mid ka yihiin kooxda u-wada-shaqaynta, soo-ururinta lacag, aadida fasaxyada gaaban, ama ka mid noqoshada guddiga maaraynta.

Adeegyada qaarkood waalidku door fiican ayay ka qaataan hawshase cid lama wadaagaan. Hawl wadaagu wuxuu khuseeyaa qaybsiga awooda, meesha culayska la saaraana waa ilmaha, mana aha hawsha.



### Maxaa caawima?

Wada-shaqayntu waa isku ixtiraamida hawsha. Marka wada-shaqayntu jirto.

- Waxaa jira wada-skeekaysi aan rasmi ahayn had iyo jeer badanaa waqtiyada ilmaha la keenayo ama la qaadayo.
- Waalidka iyo mihnadlayaashu si furan oo degan ayey uga wada hadlaan arrin kasta iyo wax kasta oo welwel laga qabo.
- Mihnadlayaashu waxay hellaan hab ay kala hadlaan waalidka siday ahayd maalinta ilmahoodu, hab ka durugsan keliya muujinta barnaamijyada maalmeed ama asbuuceed.
- Mihnadlayaashu waxay qof walba la qaybsadaan "akhbaarta fiican" oo ku saabsan ilma.
- In waalidku ku jahaysan yahay xaallada ilmaha waa wax la aqbali karo waxaana loo arkaa wax fiican, mihnadlayaashuna waa soo dhowaynayaan in waalidka shaqadiisutahay raxmad u haynta iyo u hadlida ilmahooda.
- Waalidka waxaa lagu dhiirigeliyaa inay la wadaagaan macluumaadka, wixii welwel laga qabo, weydiinta su'aallaha, samaynta codsiga bixinta dhaliil wax lagu saxayo. Mihnadlayaashu si dhab ah ayay u qaataan waxa waalidku malaynayo iyo waxa waalidku doonayaan.
- Mihnadlayaashu waxay u shaqeeyaan si kalsooniyi ku jirto, waxayna rabaan inay wada-xaajood galaan isla markaana cadeeyaan waxa laga rabo, kuna kalsoon yihiin inay wax ka qabtaan caqabadaha la soo darsa una furnaadaan mawqifka kuwa kale.
- Waxa la iska rabo waxa loo eegaa si ku salaysan shakhsiga sida carruurta tahay oo kale.

Waxaa ugu muhiimsan tayada sarre ee daryeelka ilmaha waa markay cadahay in waxa ugu muhiimsan ilmanimada hore ay tahay xoojinta isku-xirnaanta waalidka iyo ilmaha iyo siyaadinta soo dhowaynta iyo qiimaynta waalidka ee ilmahooda.

**Xaashida xaqiiqada waalidka waa la hellaa iyadoo luqada badan ku qoran waxaana laga daabacan karaa websaytka Ilmanimada Hore kaas oo ah [www.econnections.com.au](http://www.econnections.com.au)**

Waxaa taageeray

Dadaalka

